# VPAS

Adeegga Baadhista Meydka Dhallaanka ee Victoria

# Go'aaminta in ilmahaagu u baahan yahay in la sameeyo baaritaanka meydka

Aad baanu uga xunahay geerida kusoo gashay.

Go'aamada aad qaadan doonto dhimashada dhallaankaaga ka dib waxay noqon doontaa qaar ka mid ah kuwa ugu adag ee aad waligaa sameyn doonto.

Waxaa laguu siiyay macluumaadkan si ay kaaga caawiso inaad go'aan uga gaarto in loo baahan yahay in la sameeyo baaritaan meyd iyo in kale (kaas oo sidoo kale loo yaqaan autopsy) ee ilmahaaga. Hadafkayagu waa inaan bixinno xog cad iyo macluumaad sax ah oo kaa caawinaysa inaad qaadato go'aan aad xog-ogaal u tahay oo ku habboon adiga, qoyskaaga iyo ilmahaagaba.

Xaashidan macluumaadka ayaa sharraxaysa adeegyadeena, faahfaahinta fursadaha kala duwan ee la heli karo dhimashada ka dib, halka ay ka dhacayaan iyo sida aan u xaqiijin karno in ilmahaagu si badbaado leh u yimaado.

Haddii ay jiraan wax aadan hubin, ama aad jeclaan lahayd in lagaa siiyo sharaxaad dheeraad ah, fadlan ha ka waaban inaad waydiiso qofka kula wadaagay adiga xaashidan macluumaadka.

Waa muhiim inaad haysato dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay ka hor intaadan go'aansan baaritaanka dhimashada ka dib la sameeyo. Waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad arimahan kala hadasho qoyskaaga. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad raadsato hagitaan iyo taageero dhanka diinta ama dhaqanka ah, ama xitaa aad la hadasho waalid khibrad u leh xaaladan (eeg agabka murugada ee QR koodhka bogga 4).

## Waa ayo Adeegga Baadhista Meydka Dhallaanka ee Victoria (Victorian Perinatal Autopsy Service)?

Adeegga Baadhista Meydka Dhallaanka ee Victoria (The Victorian Perinatal Autopsy Service - VPAS) waxa uu bulshada ku nool Victoria siiyaa adeegyada baadhitaanka dhimashada ilmaha ee xilliga dhalmada. Dhimashada xilliga dhalmada waxay ka kooban tahay ilmo dhasha ayagoo meyd ah (stillbirths) iyo ilmo dhinta marka uu dhasho ka (neonatal deaths). Dhimashada ah ilmaha oo dhasha ayagoo meyd ah (stillbirth) waa marka ilmuhu dhasho iyada oo aan lahayn calaamado nololeed ka 20 isbuuc oo uur ah ka dib ama uu miisaankiisu ka badan yahay 400g haddii aan la garanayn uurka inta uu soo jiray. Dhimashada timaada marka uu ilmuhu dhasho ka dib (neonatal) waa marka ilmuhu dhinto 28 ka maalmood ee ugu horreeysa noloshooda.

VPAS waxaa samaysay Dawlada Victoria waana wada shaqayn ka dhaxaysa Cisbitaalka Haweenka ee Royal, Monash Health, Cisbitaalka Haweenka ee Mercy iyo sheybaaryaashooda.

Waxaan si dhow ula shaqeynaa isbitaalada Victoria si aan u taageerno qoysaska ay soo wajahdo geerida ilmaha. Waxaan siinaa macluumaad iyo hagitaan shaqaalaha isbitaalka waxaanan isku dubaridinaa codsiyada ah in la baaro meydka marka uu ilmuhu dhinto.





DOCUMENT NUMBER FAM-GUI-01 DECIDING IF YOUR BABY SHOULD HAVE A POST-MORTEM EXAMINATION REVISION NUMBER 01 EFFECTIVE DATE 21-JUN-2024

## Waa maxay baaritaanka meydka (post-mortem)?

Baarista meydka (post-mortem) waa baaritaan caafimaad oo lagu sameeyo jirka dhimashada ka dib kaas oo uu samaynayo khabiir caafimaad. Dhammaan baaritaanada meydka ee la sameeyo dhalmada ka dib waxaa ka qeyb galaya takhtarka cudurada dhalmada. Waa takhaatiir xirfad sare iyo khibrad leh oo si gaar ah ugu tababaran baarista meydka dhallaanka.

Baaritaanka meydka nooc kasta oo uu yahayba lama sameyn doono ogolaanshahaaga la'aanteed. Go'aankaaga waa in lagu diiwaangeliyaa ogolaanshaha VPAS ee foomka baaritaanka meydka dhallaanka.

Baadhitaanku wuxuu u dhacaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah marka ilmahaagu dhinto ka dib. Tani waxay badanaa ku dhacdaa dhowr maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood.

Ilmahaaga had iyo jeer waxaa loola dhaqmi doonaa si taxadar leh oo ixtiraam leh laga bilaabo marka loo qaado goobta takhasuslaha, inta lagu jiro baaritaanka iyo marka lagu celiyo maamulaha aaska ee aad adigu dooratay.

Baaritaanka meydka ee dhallaanka iyo baaritaan kasta oo dheeri ah ayaa raacaya tilmaamaha Ururka Bulshada Dhalmada ee Australia iyo New Zealand (Perinatal Society of Australia and New Zealand - PSANZ).

Marxaladaha qaar, dhimashada ilmaha waa in loo gudbiyaa baaraha guud ee meydadka (coroner). Haddii ay taas dhacdo meyd-baaraha ayay masuuliyad ka saaran tahay inuu diyaariyo baaritaanka dhimashada ka dib. Tani waa wax aan badanaa dhicin waxaana kaala hadli doona shaqaalaha idin daryeelaya adiga iyo ilmahaaga.

## Waa maxay sababta aan u bixino baaritaanada meydka?

Marka ilmuhu dhinto, waxaanu bixinaa baadhitaanka meydka si loo fahmo waxa dhacay.

Iyadoo ay ku xiran tahay xaaladaha uurkaaga, baarista meydka ayaa laga yaabaa inay naga caawiso in lagu ogaado macluumaad dheeraad ah oo muhiim ah oo ku saabsan xaalad kasta oo la ogaa dhalashada ka hor iyo sababta dhimashada.

Waxay kaloo bixisaa macluumaad qiimo leh oo loogu talagalay uurka mustaqbalka waxayna taageertaa cilmi-baarista si looga hortago dhimashada timaada dhalmada kahor iyo dhimashada dhallaanka ee dhalmada ka dib timaada.

## Waa maxay noocyada kala duwan ee baarista meydka?

Noocyo kala duwan oo ah baarista meydka dhallaanka ayaa la heli karaa, mid kastana waxay bixisaa heerar kala duwan oo faahfaahin ah. Markasta oo si qotodheer baaritaanka loo sameeyo, waxay ka dhigan tahay in xogta aan ku heli karno ay badan tahay.

Dhammaan baaritaanada meydka waxa ka mid ah in la qaado sawiro caafimaad iyo baadhista mandheerta. Waxa kale oo laga yaabaa inay ku jiraan baadhitaano kale sida raajo, MRI scan (kuwaas oo bixiya muuqaalo gudaha ah oo faahfaahsan), iyo baadhitaanada caabuqyada iyo xaaladaha hiddaha.

### Baaritaan dhameystiran oo meydka lagu sameeyo

Baaritaan dhameystiran oo meydka lagu sameeyo waxay ku lug lahaaneysaa baadhis buuxda oo lagu sameeynayo gudaha iyo dibeda jirka ilmahaaga. Inta lagu jiro baaritaanka jirka gudihiisa ah, takhaatiirta cilmi-nafsiga ayaa sida caadiga ah sameyn doona laba furin (laba meel oo la jeexay) waxayna si taxadar leh usoo saarayaan isla markaasna u baarayaan xubnaha jirka iyo maskaxda. Tijaabooyin yaryar oo unugyada ah (sida biopsy) ayaa la qaadi doonaa si loo baaro loona keydiyo. Unug kasta ama xubin kasta, oo ay ku jirto maskaxda, ee aan loo baahnayn in la ogaado inay cudur qabto waxaa lagu soo celin doonaa jirka ilmahaaga inaad adigu dhahdo yaan lagu soo celin mooyee.

Baaritaanka ka dib, meelaha la jeexay ayaa si taxadar leh loo xirayaa, ilmahaagana dhar ayaa loo xiri karaa. Marka maro lagu daboolo, meelaha la tolay ee jirka ma muuqan doonto.

### Baaritaan kooban oo meydka lagu sameeyo

Baaritaan kooban oo meydka lagu sameeyo, kaliya qaybo ka mid ah baaritaanka meydka ee dhameystiran ayaa la sameyn doonaa.

Takhaatiirta cilmi-nafsiga ayaa si fiican u baari doona bannaanka jirka ilmahaaga. Waxay markaa samayn doonaan baadhitaan kooban oo jirka ah oo lagu sameynayo xubno gaar ah ama meelaha aad adiga iyo dhakhtarkaagu go'aansataan.

Tusaale ahaan, waxa aad dooran kartaa in dibadda jirka oo keliya la baaro iyo xubnaha jirka ee caloosha (caloosha) gudaheeda kujira la baaro. Ama, waxaa laga yaabaa inaad ogolaato in maqaarka jirka sheybaar loo diro si loo baaro hidde-sidaha.

Tijaabooyinka unugyada yar ayaa loo qaadayaa si loo baaro oo loo kaydiyo.

### Baaritaanka meydka ee jirka dibadiisa ah

Baaritaanka meydka ee jirka dibadiisa ah waxay ku lug leedahay baadhis dhamaystiran oo lagu sameeyo bannaanka jirka mahaaga. Ma jiri doono baaritaan gudaha ah, lama jeexi doono mana jiri doonto muunado (samples) unugyada ah oo la qaadi doono.

## Maxaa ku dhacaya unugyada iyo xubnaha jirka baaritaanka meydka marka la sameeyo ka dib?

Baaritaanka meydka ka dib, takhtarka cudurrada ilmagaleenka ayaa baari doona qaybo yaryar oo unugyo ah oo lagu qaaday mikroskoob. Muunadan waxaa lagu keydiyaa meel ayagoo la gooba goobeeyay. Marka la baaro, gooba goobahan waxaa lagu kaydiyaa waaxda cudurada.

Isbitaalada waxaa sharciyan looga baahan yahay inay ugu yaraan 25 sano xafidaan unug kasta (oo gooba-goobeysan) oo la qaaday intii ay socotay baaritaanka meydka.

Muunad yar oo unug ah ayaa sidoo kale laga yaabaa in baraf laga dhigo lana keydiyo si markaas baaritaan loogu sameeyo mustaqbalka haddii aad adiga iyo dhakhtarkaagu go'aansataan in taasi lama huraan tahay.

Dhammaan unugyada haray ama xubnaha jirka waxaa dib loogu celin doonaa jirka ilmahaaga. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood ilmaha yaryar ee leh xubnaha aadka u yaryar, waxa laga yaabaa inaan u baahanno xubintooda jirka oo dhan si loo helo muunad ku filan in baaritaan lagu sameeyo.

Haddii aad fasax u siisay cusbitaalka inay cilmi baaris iyo qaab qaxbarasho u isticmaalaan wax kasta oo ka soo haray unugyada ama xubnaha jirka, fadlan ogow in tani ay qeyb ka noqon karto unugyada la gooba goobeeyay, unug cusub iyo sawiro caafimaad. Ilmahaaga lagama aqoonsan karo waxyaabahan.

Haddii aad rabto, mandheertaada ayaa laguu soo celin karaa baaritaanka ka dib. Baaritaanka mandheerta waxay ku lug leedahay qaadista muunad yar si loo baaro iyo isticmaalka formalin (kiimiko naga caawinaysa in mandheerta ay sideeda ahaato oo aysan is bedelin).

## Waa maxay faa'iidooyinka iyo khasaaraha ay leeyihiin baaritaanka lagu sameynayo meydka?

Faa'iidooyinka

Baarista meydka waxaa laga yaabaa in:

- Lagu ogaado macluumaad ku saabsan sababta keentay dhimashada ama waxa loo baahan yahay inaan loo aqoonsan sababta dhimashada.
- In lagu xaqiijiyo da'da uurka ee ilmahaaga.
- In lagu ogaado jinsiga ilmahaaga.
- In lagu ogaado qiyaastii xilliga uu dhallanku dhintay
- Inay sharaxaad ka bixiso muhiimadda hidde-sidaha ama dhibaatooyin jireed.
- In lagu ogaado macluumaad ku saabsan waxyaabaha loo baahan yahay in tixgelin la siiyo uurka mustaqbalka.
- In la helo xog iyo macluumaad haga cilmi-baarista ku saabsan dhimashada timaada xilliga dhalmada taas oocaawin karta qoysaska kale iyo dhallaanka mustaqbalka.

**Khasaarooyinka**

- Dhimashada meydka waxaa laga yaabaa inaan mar walba lagu ogaan sabab gaar ah oo dhimashada keentay.
- Baaritaanada aan sahlaneen ee la sameeyo dhimashada ka dib ayaa laga yaabaa inay ka dhigan tahay in loo baahdo in ilmahaaga lasii heysto wakhti dheer, taas oo horseedi karta dib u dhac ku yimaada qabanqaabada aaska. Waxaad awoodi doontaa inaad go'aansato in lasii wado baaritaannadan iyo in kale, kooxdaada daryeelka caafimaadkuna waxay caddayn karaan inta ay qaadan karaan.
- Baaritaanka gudaha ka dib, ilmahaaga jirkooda waa la toli doonaa, laakiin kuwani ma muuqan doonaan marka ilmahaaga dhar loo geliyo.
- Qoysaska qaarkood waxay dareemaan farqi u dhexeeya sida ay dareemayaan marka ay taabtaan ilmahooda baaritaanka meydka ka dib.

## Xagee baaritaanka meydka lagu sameyn doonaa?

Victoria gudaheeda baadhitaanada dhimashada ka dib waxa lagu sameeyaa mid ka mid ah saddexda goobood ee takhasuska leh, waxayna ku xiran tahay meesha uu ilmahaagu ku dhintay. Goobahan dhamaantood waxay ku yaalaan Melbourne. Waxay kala yihiin:

- Isbitaalka Royal Women's Hospital, Parkville (Royal Children's Hospital Pathology)
- Isbitaalka Mercy ee Haweenka, Heidelberg (Austin Pathology)
- Caafimaadka Monash, Clayton (Monash Pathology)

Shaqaalaha ku daryeela ayaa ku ogeysiin doona cosbitaalka baari doona ilmahaaga.

## Yaa ilmahayga u qaadaya baaritaanka?

Waxaan leenahay koox gaadiid oo u heellan oo khibrad u leh oo u tababaran daryeelka dhallaanka.

Haddi aad go'aansato in ilmaha meydkooda la baaro, waxaanu kooxdayada u diri doonaa cisbitaalka uu ilmahaagu ku jiro. Waxay hubin doonaan in ilmahaagu diyaar u yahay safarka oo uuna si nabdoon goobta usoo gaaro si baaritaanka loo sameeyo.

Haddii aad ku nooshahay meel tuulo Victoria ku taal ah, waxaanu sidoo kale diyaarin doonaa in baaritaanka ka dib ilmahaaga dib loogu soo celiyo agaasimaha aaska ee aad doorатay inuu kaa caawiyo aaska.

Adeegani waa lacag la'aan

## Intee in le'eg ayay qaadataa baaritaanka meydka?

Baaritaanka dhimashada ka dib wuxuu ku bilaabmaa baaritaanno dibbada jirka ah sida raajo ama MRI. Baaritaanadan waxa loo samayn doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah laakiin waxa ay qaadan kartaa dhawr maalmood, waxayna ku xiran tahay marka adeegyadaas la heli karo.Baaritaanadan marka la dhameeyo ka dib, baaritaanka jirka gudihiisa ah, oo ku lug leh qalliin, ayaa dhici kara. Baaritaanka guduhu wuxuu qaadan doonaa ku dhawaad saddex saacadood.

Waxaan fahamsanahay inay muhiim kuu tahay inaad ogaato inta ilmahaagu ku jiri doono daryeelkayaga, sababtoo ah tani waxay saameyn kartaa qorshahaaga aaska ilmahaaga.

Wax kale oo ay tahay in laga fiirsado waa halka adiga iyo ilmahaaga aad ku sugan tihiin. Haddii aad ku sugan tihiin meel tuulo Victoria ah, waxaanu sidoo kale u baahan doonaa inaanu xisaabta ku darsano wakhtiga ay qaadanayso in ilmahaaga loo qaado dhakhtarka cudurada dhalmada ee Melbourne.

Shaqaalaha ku daryeelaya waxay la xiriiri karaan isku-duwaha VPAS si ay fikrad sax ah uga helaan marka ilmahaaga laguu soo celin doono.

## Maxaa dhacaya baaritaanka meydka ka dib?

Marka baarista meydka ay dhamaato waxaan la xiriireynaa maamulaha aaska ee aad dooratay inuu kaa caawiyo qabanqaabada aaska.

Waxaan isku dubaridi doonaa in dhallaankaaga si badbaado leh oo ixtiraam leh looga wareejiyo daryeelaheena looguna wareejiyo ayaga.

## Ma arki kartaa ilmahaaga baaritaanka meydka ka dib?

Haa. Waalidiinta qaarkood waxay doortaan inay waqti la qaataan ilmahooda baarista meydka ka dib, ama inta ilmahoodu ku jiro daryeelka agaasimaha aaska ama, xaaladaha qaarkood, waxay waqti kula qaataan guriga.

## Goorma ayaad heli doontaa natiijada baaritaanka meydka?

Baaritaanka meydka ka dib, takhtarka cudurada dhalmada ayaa qori doona warbixin tafatiran oo sharaxaysa waxa ay heleen. Warbixinta ayaa inta badan lagu dhammeeyaa 10 ilaa 12 toddobaad gudahood, waxayna ku xiran tahay baaritaanada loo baahan yahay iyo inta ay qaadanayso in natiijada la helo.

Warbixinta waxaa loo diri doonaa dhakhtarka idin daryeelay adiga iyo ilmahaaga. Waxay kuu qabanqaabin doonaan ballan dabagal ah si ay kaala hadlaan wixii la helay intii lagu jiray baaritaanka meydka ilmahaaga.

## Waa imisa kharashka ku baxaya?

Ma jiri doonto wax kharash ah oo ku baxaya baaritaanka meydka. Tan waxaa daboolay VPAS.

Waxaan sidoo kale dabooli doonaa kharashka ku baxaya in ilmahaaga loo qaado goobta takhasuska ee lagu baarayo iyo in dhallaanka laga keeno guryaha ku yaal tuulooyinka fog.

## Goorma ayaa loo baahan yahay inaad go'aan gaarto?

Kooxdaada daryeelka caafimaadku waxay kaala hadli doonaan baarista meydka marka uu ilmahaagu dhinto ka dib. Waa muhiim inaad go'aankanu gaarto sida ugu dhaqsaha badan ee aad awooddo sababtoo ah in la daahiyo waxay saameyn kartaa natiijooyinka baaritaanka inay sax yihiin iyo in kale.

Waqti la qaado ilmahaaga iyo qoyskaaga si aad u doorato waxa kugu habboon.

## Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad ah waxaad iskaan gareen kartaa summadan QR:

**Baaritaanka meydka dhallaanka**

**Xog ku saabsan baroor-diiqda**

## La xidhiidh xidhiidhiyaha VPAS haddii aad u baahan tahay tafaasiil dheeraad ah

**T** 1800 841 024

**E** VPAC@thewomens.org.au

**Saacadaha**

Isniin ilaa Jimce

9:00-ka subaxnimo ilaa 5:00-ta galabnimo.